To: Abdi-Rahman ...

02.02.2024

**Jamhuuriyada Somaliland**
**Dawlada Hoose Hargeysa**

**Republic Of Somaliland**
**Municipality Of Hargeisa**

*Xafiiska Hubinta Iyo Dabagalka Dhulka*

***Ref/DH/GHDDH/_0082/2023*** ***Date: 12 June 2023***

Ku:Duqa Caasimada JSL =Hargeysa
Ku: Xoghayaha Fulinta DHH = Hargeysa
Ku:Kuxigeenka Duqa Caasimada JSL = Hargeysa

## UJEEDO: WARBIXIN DHUL LA ISKU HAYSTO LAHAANSHIHIISA

Anigoo tixraacaya amarka uu xoghayaha fulintu noogu diray guddi ahaan kuna saabsan muran iyo is-qabsi u dhaxeeya laba beerood oo ay kala sheeganayaan **Maxamed Cabdilaahi Diiriye Iyo Maxamed Cabilaahi Raage**. Dhulkan waxa uu ku yalaa **Degmada Axmed M. Haruuun**, gaar ahaan dhulka galbeedka ka xiga Naaso-hablood saaranna jidka wadada 200ft.

Guddidu si ay u hubiso sida uu u jiro is-qabsigu waxay qaaday tallaabooyinkan:

1. In ay isugu yeedhay labada dhinac ee is haya, warysina la yeelatay.
2. In laga qaaday maps ay sharci ahaan u haysteen dhulka.
3. In dhinaca muwaadin **Maxamed Cabdilaahi Diiriye (3 Five)** ay Guddidu raacday taariikhdu markay ahayd **6 May 2023** dhulkiisana lagu soo qaaday **GPS**, isaguna na mariyay dhulka uu sheeganayo kaas oo ka kooban **73 blocks** sida ka muuqata GPSka guddidu soo qaaday.
4. In dhinaca kale ee muwaadin **Maxamed Cabdilaahi Raage (Gadhle)** Gudidu raacaday **8 May 2023** isna dhulkiisa lagu soo qaaday **GPS**, kaas oo ka kooban **26 blocks** sida ka muuqato GPSka guddidu soo qaaday.

Maadaama kiiskani uu cuslaa guddidu waxay iska saartay xil wayn weliba iyadoo og in dhulka is-qabsiga ah ee u dhaxeeya labada dhinac aanu ka fursanayn **maxkamad**, hadana waxa lagama maarmaan noqotay in la sameeyo baadhid dheer si loo ogaado sida wax la-iskugu hayo iyo weliba inta mid walba ka kale dhul ahaan ku haysto **(boundary dispute)**.

Kiiskan maadaama dadka u socday amma cidda danaynaysay ay badnaayeen, waxa lagama maarmaan noqotay in kiiskan lagala xidhiidho cidda lahaanshaha leh oo keliya kuwaas oo ah cid dhul ahaan u haysta sharci ka diiwangashan Dawladda Hoose ee Hargeysa.

Ku: Agu Dhulka

07/01/2024

Gebogebadii guddidu markii ay daristay, baadhay, u kuur gashay, ogaatayna in dhulkan sida uu u jiro isku-dhiciisu yahay laba beerood oo dhul isku mida isku haysta waxaa noo soo baxday qodobadan:

1. In muwaadin **Maxamed Cabdilaahi Diiriye (3 Five)** ay Dawladda Hoose u yaalaan **laba beerood** oo codes-koodu kala yahihiin **33 iyo 88.** Beerta code-keedu yahay **88** waxa ay ka koobnayd **77 blocks, xilliga la qorsheeyayna kuma cada sheetka.** halka ta code-keedu yahay **33** ay iyaduna tahay **115 blocks** taas oo taariikhda la **qorsheeyay tahay 2015**. In dhulkan uu na mariyay aanuu ahayn kuwa uu mapka inoo yaala dhigayo markii aanu akhrinay maps-ka inoo yaala xafiiska.
2. In muwaadin **Maxamed Cabdilaahi Raage (Gadhle)** ay xafiiska mapka u diiwan gashantay hal beer oo code-keedu yahay **36 kana kooban 26 blocks.**
3. In muwaadin **Maxamed Cabdilaahi Diiriye (3 Five)** markii guddidu raacday aanu na marin dhul leh **Made amma Calaamad,** sidoo kalena ay ka muuqatay in aanu garanayn dhulka uu sheeganayo isagoo si iskiiya isaga socday oo aanuu na tusin madihiisii ama kaabado uu hubo.
4. In muwaadin **Maxamed Cabdilaahi Raage (Gadhle)** markii guddidu raacday uu na mariyay dhul sugan oo leh kaabado ama calaamad lagu kalsoonaan karo, sidoo kale in ay garanayeen dhulka u ah madaha ama ay wadagaan cidda ay la leeyihiin xad.
5. In muwaadin **Maxamed Cabdilaahi Raage (Gadhle)** ay is yeesheen dhulka uu sheeganayo iyo **GPSka** uu na mariyay kana muuqato **(benchmark)** wadada **200ft**. laakiin keliya dhulka uu muwaadinkani sheeganayo waxa uu ka gudbay xadkii dhinaca wadada u yaalay ee Naaso-hablood.
6. Enginerkii qorsheeyay beerta maxamed cabdi laahi raage gadhle oo ah eng cabdalle waxa u cadeeyaay markii uu qorshaynay beerta in aanu jirin wax is qabsiya ama murana oo u dhaxeeya labada dhinac.

<u>SOO JEEDIN</u>

Kadib markii aanu darisnay qodobada kor ku xusan ee ka soo baxay baadhitaankii qotoda dheeraa ee ay guddidu samaysay, guddidu waxay soo jeedinaysaa:

1. In **casaan la geliyo** dhulka ay isku hayaan labada muwaadin gebi ahaantiisba inta xal laga gaadhayo si looga hor tago in iibka labada dhinac sii bato kadibna khilaafku sii kordho.
2. In cidii ku qanci wayda ay maxkamada dacwad ka furato
3. In kiiskan ka garnaqiisu uu ku koobnaado labada dhinac ee dhulka isku haya lana joojiyo cid kasta oo ay ka iibiyeen **(Third Party)**.

Cabdilaahi Aadan Yuusuf
Xubin Gudida Hubinta Iyo Daba Galka Dhulka

Axamed Cismaan Xandule
Kuxigenka Gudoomiyaha Gudida Hubinta Iyo Daba Galka Dhulka

Maxamed Yuusuf Cismaan
Gudoomiyaha Gudida Hubinta Iyo Daba Galka Dhulka
Email.MohamedYusuf@dhhgov.org Hargeysa